

WAXAANU NAHAY DOL TAADA



QAYBTA XEERARKA MUHAAJIRKA IYO ARRIMAHA

QAYBTA XEERARKA MUHAAJIRKA IYO ARRIMAHA (DIPA)

DIPA waxay xaqiijisaa in adeegyada, barnaamijyada iyo ilaalinta Waaxda Shaqada loo heli karo dhammaan shaqaalaha. Tan waxaa ka mid ah kooxaha soo badanaya ee dadka ee u soo guuray Gobolka New York ee ka yimid wadamo kale iyo kuwan ku hadla luqaddaha kale ee aan ingiriisiga ahayn.

WACYI GELIN

DIPA waxay ku wargelinaysaa muhaajiriinta, qaxootiga iyo Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga (ELL) waxa ku saabsan xuquuqaha goobta shaqada. Waxaanu u sheegnaa waxa ku saabsan caawimada ay bixiso DOL sida:

- Tallaabada mushaharka aan la bixin, wakhtiga dheeraadka ah ee shaqada, iyo dheefaha kale
- Xaqiiqooyinka ku saabsan caymiska shaqo la'aanta
- Kaalmada raadinta shaqada iyo caawimada xirfada shaqo
- Xidhiidhada wakaaladaha kale lala leeyahay iyo kooxaha wixii caawimo ah
- Macluumaadka ku saabsan Ka ganacsiga Dadka

DIPA sidoo kale waxay wax bartaa mulkiilayaasha ganacsiyada yaryar waxa ku saabsan:

- Sharciyada Shaqada
- Masuuliyadooda sharciga ah
- Ilaha DOL ee iyaga caawin kara
- Ka ganacsiga Dadka

XEERARKA IYO SHARCIYADA

DIPA waxay u shaqaysaa si ay u xaqiijiso in Waaxda Gobolka New York ee Shaqadu ay buuxisay baahiyaha Muhaajiriinta, qaxootiga iyo Ardayda Barata Ingiriisiga. Waxaanu dib u eeganyanaa sida xeerarka NYSDOL, nidaamyada iyo sharciyadu u saameeyaan bulshooyinkooda.

DHIBANAYAASHA DEMBIGA

Ka ganacsiga Dadka iyo shaqada la isku khasbo waa dembi ka faa'iidaysta dadka reer New York, ay ku jiraan muhaajiriinta, qaxootiga iyo Ardayda barata luqadda Ingiriisiga. DIPA waxay caawisaa inay la dagaalnato gobolka oo dhan. Waxaanu sidoo kale u tixraacaynaa dhibanayaasha wakaaladaha gobolka ee iyaga ka caawin kara inay helaan adeegyada ay xaqa u leeyihiin ee waafaqsan sharciyada falka dembi ee gobolka

Dhibanayaasha dembiyada qaarkood waxay ka codsan karaan dowladda federaalka wixii ah fiisoooyinka gaarka ah. Si loo codado, waa in lagu ansixiyaa dhexda wakaalada sharci fulinta. Gudaha DOL, DIPA waxay dib u eegtaa codsiyada U iyo T caddaynta fiisaha.

BEERAHA

DIPA waxay u shaqaysaa si ay u xoogayso New York qaybteeda beeraha ee wayn ee kala duwan. Isku marna, waxaanu barnaa shaqaalaha beeraha waxa ku saabsan xuquuqdooda iyo adeegyada loogu heli karo dhexda DOL. Waxaanu booqanaa beeraha si aanu uga caawino loo shaqeeyayaasha inay u hogaansamaan sharciyada shaqada. Waxaanu sidoo kale ka caawinaa beeralayda inay helaan shaqaale beeraha ah oo takahsus leh si loo buuxiyo baahiyahooda shaqada. DIPA waxay habbaysaa codsiyada H-2A, waxay qabataa baadhitaanka guryaynta, waxay bixisaa caawimada waraysiga luqadda Isbaanishka, oo waxay ka shaqaysaa si ay u caawiso Waaxda Shaqada Maraykanka wixii ah hubinta in qandaraasyada H-2A loo hogaansamay.

LA XIDHIDH DIPA

Telefoonka: **877-466-9757 (877- IMM-WRKR)**

limaylka: **dipa@labor.ny.gov**

Websaydka: **www.labor.ny.gov**